Erayga iyo Maanta Somtwt 0253
Dhexdhexaadin

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqashaan saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **Salaadda.**

Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Doug Schroder. Sii dhegayso barnaamijka saaxiib marka aynu mawduuca kore ee ku saabsan **Salaadda** ee aan halkan idiinku lafaguri doonno aad maqli doontaan. Haatanse aynu dhegaysnno qasiiddadan.

SONG: AAN AMMAANNO RABBIGA.

Waxaannu doonaynaa inaannu qaddar daqiiqado ah maanta wada gorfayno mawduuca ku saabsan Salaadda. Khusuusan, waxaannu eegaynaa kitaab ka mid ah kutubka Baybalka oo nin oday ah uu u qorayo nin dhallinyaro ah. Rasuul Bawlos ayaa qoray labada kitaab ee kala ah Timoteyskii 1aad iyo Timoteyoska 2aad, iyo Warqaddii wacdiye Titos. Labada warqadood waxaa loo qorayey wacdiyayaal da' yar.

Bawlos noloshiisii oodhan ilaa iyo maalintii uu soo hanuunay oo uu rumaystay M asiixa, iyo wixii ka dambeeyey, wuxuu ku mashquulsanaa dhismaha kiniisado, oo wuxuuna u hayey talooyin kiniisadaha uu aasaasay. Haddaba warqaddan 1&2 ee Timoteyos iyo tan loo qoray Titos, wuxuu tusmaynayaa raggan wacdiyayaasha ah ee dhallinyarada ah wuxuuna siinayaa talooyin muhiim ah oo ku saabsan hoggaaminta suubban ee jameecada masiixiyiinta ah.

Mid ka mid ah waxyaalihii uu kala hadlay ayaa waxay ahayd salaadda. Warqaddan kowaad ee rasuulku u qoray Timoteyos cutubka 2aad ayaa

Rasuul Bawlos wuxuu leeyahay sida ku qoran 2:1-6, oo leh:

"Sidaas daraaddeed ugu horraysta waxaan kugu waaninayaa inaad Ilaah u baridid, oo aad u tukatid, oo aad u ducaysid, oo aad u mahadnaqdid dadka oo dhan, khusuusan boqorrada iyo kuwa amarka lehba, inaynu nolol xasilloon oo nabdaysan ku noolaanno, innagoo si walba cibaado iyo maamuus u leh. Taasu way wanaagsan tahay, waana mid Ilaaha Badbaadiyeheenna ahu aqbali karo. Wuxuu doonayaa in dadka oo dhammu badbaado oo ay runta gartaan. Waayo, waxaa jira Ilaah keliya iyo dhexdhexaadiye keliya oo u dhexeeya Ilaah iyo dadka, waana ninka Ciise Masiix ah, oo naftiisii dadka oo dhan furashadooda u bixiyey, oo wakhtigiisii qummanaa loo markhaati furay."

Ogow in halkan lagu sheegay dhowr nooc oo salaado kala duwan ah, Waxaana ka mid ah salaado dadka loo tukanayo ama Ilaah loo baryayo, mahadnaqid iwm. Masiixiyiintu waxay garanayaan markii ay daraasad ku sameeyaan waxyaalaha aasaasiga ah ee Baybaka, inay jiraan hannaan kala duwan oo salaadaha ku taxluuqa. Tusaale ahaan, haddii qofi meel ka soo faniino oo uu ku dhow yahay inuu dhaawac soo gaaro, magaca Ilaah buu u yeeran karaa isaga oo leh: **"Ilaahow I badbaadi!"**

Waxaa jira kara qof cusbataal yaalla, oo dhaawacmay, waxayna Ilaah weyddiisanayaan bogsiin. Salaad kale ayaa jirta oo dadka kale loo tukanayo—waxaana loo yaqaannaa dhexdhexaadin aad qofka iyo Ilaah kala dhex joogto, ama aad Ilaah qofkaasi u weyddiinayso nabad iyo xasilooni iwm. Xaqiiqatan, markii shakhsiyaadka qaar ay dhibaato haysato oo aad u tukanayso ayaa loo yaqaannaa dhex dhexaadin, waa qofka ay dhibaatadu ka haysato khamriga ama

daroogada, oo aad doonayso in axwaalkiisu is beddelo. Markaad qof u ducaynayso waa marka masiixiyiintu ay Ilaah hor joogaan oo ka baryayaan inuu qof kale oo dhibaataysan axwaalkiisa beddelo, waxaana loo yaqaannaa intercesion ama dhexdhexaadin. Laga yaabo in qofkaasu jirran yahay, ama uusan degganayn ama uu ka tegay Iimaankii.

Laga yaabo in shakhsigaasi uusan garanaynin Sayidka, markaasina masiixiyiintu Ilaah bay hor iman karaan oo isaga xaalkiisa Ilaah hor keeni karaan. Waa mawduucan kan Ruuxa qoduuska ahi aalaaba ina dul imanayo, waxaana arrinkaas looga hadlay Warqaddii rasuul Bawlos u qoray dadka reer Rooma 8:20, oo leh:

"Sidaasoo kalena Ruuxu wuxuu inaga caawimaa itaaldarradeenna, waayo, garan mayno wax inoo eg oo aynu ku tukanno, laakiin Ruuxa qudhiisu waa inoo duceeyaa isagoo ku taahaya taah aan sanqadhayn."

Aalaaba Ruuxa Ilaah waxaa uu doonayaa hawsha dhexdhexaadinta, iyo in nolsha kuwa kale loo tukado si loo barakeeyo oo ay Iimaan sugan u helaan. Markaasina qofka Masiixiga ah qof kale wuu u tukan karaa, oo soo dhex geli karaa dhibka haysta, oo Ilaah u baryi karaa. Waxaa kaloo jira mahadnaqid Ilaah loo mahadnaqayo. Waxaan u malaynayaa in Ilaah aad ugu farxo dadka mahad-naqayaasha ah.

Hadii aad xusuusato inaad qof ku tiraahdo mahadsanid, waa qof hadiyad ku siiyey e, waa asluub aad muujisay, taasina xitaa iyaga way ka farxinaysaa, waa kuwii hadiyadda keenay e. Waxaan rajaynayaa inaad ka mid tahay shakhsiyaadka meel waiba dhooban oo Ilaah ka hela maal iyo barakooyinka ruuxa oo haddana aan weligoodba u mahadnaqin oo aan oranaynin Eebbow mahaddaa!

Iyadoo wixii aad maqasheen oo dhan laga yiri salaadda, ayaan haddana jeclaan lahaa inaan adkeeyo in dadka dhammaan loo wada duceeyo. Eeg bal waxa halkan uu rasuulku inoogu sheegayo markaasoo uu lahaa: **"Sidaas daraaddeed ugu horraysta waxaan kugu waaninayaa inaad Ilaah u baridid, oo aad u tukatid, oo aad u ducaysid, oo aad u mahadnaqdid dadka oo dhan, khusuusan boqorrada iyo kuwa amarka lehba, inaynu nolol xasilloon oo nabdaysan ku noolaanno."**

Bal ogow in haatan Bawlos codsanayo in loo duceeyo boqorro karaahiyo ah. Xusuuso in wakhtigaas ay masiixiyiintu joogeen Rooma. Reer Rooma waxay jeclaayeen inay caabudaan boqorrada. Boqorradu waxay ahaayeen diinlaawwyaal aan masiixiyiin ahayn, haddana rasuul Bawlos wuxuu dadka ku waaninayaa inay boqorrada u duceeyaan. Waxaanay tani wax inooga sheegaysaa dabiicadaha masiixiyiinta.

Masiixinnimadu maahan oo keliya Iimaan ama rumaysad qofku isaga keliya uu iska fakarayo. Maahan sida inaan leenahay shaqo kuma lihin dadka kale, laakiin innaga un baa iska taxadarayna. Waxaan rumaysanahay inuu jiro damac iyo duufsasho inagu dirqinaysa inaan nafteenna un xoogga saarno taasoo ku imanaysa dabeecadaha dembiga leh ee inagu jira. Laakiin waxaan arkaynaa in Masiixa awgii, Ilaah soo gaarayo dad kala duwan dabiicad ahaan.

Waxaan arkaynaa dad dembiileyaal ah oo uu soo hanuuniyey, iyo dad bogsiin u baahan oo soo hanuunay. Waxaan kaloo arkaynaa in Ciise shakhsiyaadkaas oo dhan uu bdbaadiyey. Wuxuuna kaloo gaaray kuwa isla weyn, oo xaq isla ah, oo la tusayo dembigooda iyo inay weliba u baahan yihiin toobadkeen. Bawlos wuxuu isku taxluujinayaa—inuu u keeno jacaylka iyo nabadda

Ilaah dadka oo dhan. Masiixiyiinta waa inay Ilaah u baryaan dadka dowladda ku jira, xitaa haddii dowladdu ay tahay mid arxan daran. Waxaa kaloo weliba laynaga dhowrayaa inaan u ducayno cadowgeenna. Waxaan xusuustaa in Ciise ka hadlay arrinka ku saabsan in loo duceeyo kuwa ina silciya. Taasi aad bay u adag tahay, haddana Ciise wuxuu leeyahay, **"haddii aynu jecel nahay kuwa ina jecel, maxaan dadka kale kaga duwanaanaynaa."**

Sidaad arkayso baraarujinta Masiixa waa in loo muujiyo jacayl kuwa la liido iyo kuwa sida xun loola macaamiloodo. Haddii aad qaddar ka fakarto wixii Ilaah kuugu sameeyey Ciise Masiix—ayaa Ilaah dunida u soo diray inuu soo furto duni ay ka buuxaan shakhsiyaad ku xad-gudbaya doonistiisa, oo sharci-laaweyaal ah oo aan doonayn Ilaah.

Ilaah wuxuu gaaray ama soo furtay dad isaga ka tegay ama ka baadiyoobay, wuxuuna dadka u keenay jacalkiisa, kaasoo ayan u qalmin. Laga yaabo inaad adiguba shakhsi ahaan taas garanayso, oo aad khibrad u yeelatay sida aad Ilaah uga fogaatay. Laga yaabo inaad ogsoon tahay waxa ay ka macne tahay furashada nolosha qurmoon ee dembiga leh lagaa soofurtay. Haddii ay sidas tahay, waxaan u malaynayaa in adiga qudhaadaba aad hayso qisooyin aad dadka kale la wadaagi karto.

Way ahmiyad ballaaran tahay inaad u ducayso ladnaanta beeshaada, kuwa ku jira dowladda. Waxaa kaloo ahmiyad leh in loo macaamiloodo sida qof cibaado leh oo noqda muwaadin dhowra qawaaniinta Ilaah. Laga yaabo inay jiraan dad kale oo been sheegaya—laakiin maahan in qofka masiixiga ah uu been sheego. Maahan inaad ku noolaato nolol khiyaano badan, oo caro badan iyo

in dad laga aarsado, waase inaad ku noolaato nolol istaahisha jacaylka Ciise Masiix.
Ha yeeshee waxaad moodaa in lagu noolaado nolsohaas istaahisha Masiixa ay adag tahay sida badan. Meelo badan oo dunida ah ayaan soo maray, halkaasoo masiixiyiinta lagu silciyo, waxayna ii sheegeen in sharciga looga dhaqmo meelahaas uusan cadaalad ahayn. Waxaa jira dhaqan xumo sida inaan goobaha shaqada lagu tixgalin, oo aan la dalacsiinin. Qaar badan ma haystaan meelo ay wax ku caabudaan, oo guryaha ayey si qarsoodi ah Ilaah ugu caabudaan. Mararka qaar kooxo ayaa u imaanaya oo khatar geinaya qoysaskooda ama ugu dhaaranaya inay guryahooda dudumiyaan iyo xaafadahooda. Waxaana lagu khasbaa inay lug ku baxsadaan, iyagoo aan wax ka badan Baybalkooda wadanin.
Way inagu adag tahay in kuwaas masiixiyiinta silcinaya loo duceeyo. Laakiin, xusuuso in dadkaas ay mar un hor joogsan doonaan xaakinka uunka. Qof kasta waa inuu ka war bixiyaa falimihiisa. Ninna dooni maayo inuu ka mid noqdo shakhsiyaadka u gafay Ilaaha uunkan, Sayidkii ina siiyey bixiyaha Ciise Masiix ah. Doni maysid inaad hor istaagto Ilaah oo aad ka jawaabto dembiyadaadii.
Waana sababta loogu baahan yahay inaad u ducayso xitaa cadaaayaasheenna, waayo waxaa ina hor yaal wakhti daa’imis ah. Waa wax naxdin badan in lagu dhoco gacmaha xaakinka uunka, adigoo aan hortiisa ku qumanayn. Markay hakan joogto, innaga masiixiyiinta ah waxaan Ilaah u baryeynaa cid kasta. Waxay niyadaheenna ka buuxinaysaa nabad iyo saamaxaad markii aan dadka oo dhan Ilaah u barnno. Mana ahan inaan kala dooranno kuwa aan u ducaynayno, oo aan niraahno dadka qaar uma qalmaan naxariista Ilaah, waayo haddii

aan eegno nolosheenna, waxaana arkaynaa in innaga qudheena aynaan u qalmin naxariista Ilaah. Waxaan samaynay waxyaalo dembi miiran ah, oo waxaan u gafnay Ilaah xitaa. Waa naxariistiisa oo keliya iyo nimcadiisa wixii laynagu badbaadiyey. Haddaba dadka oo dhan u duceeya—kuwa buka, kuwa dhaawacan, iyo dadka xubeerada ah. Haddii aad kartaana muujiya naxariis, oo la saaxiiba, oo kaalmeeya dadka u baahan.

Taasina waa waxayalaha ugu waaweyn ee aan samayn karno ficil ahaan salaadda ka sokow. Waxaan soo aragnay iyadoo laynagu adkaynayo inaan dadka oo dhan u ducayno, waxaanan rajaynayaa kuwiinna masiixiyiinta ah inaad taas samayn doontaan. Waxaanan qiyaasayaa inaad u ducaynaysaan qofkasta, xitaa cadowgiinna, waxaanan arki doontaan in niyaddiinu jilicsanaato. Wax kastana dhinaca Ilaah ayaad ka eegi doontaa, oo kuwa ina xumeeyeyna mar bay Ilaaha Uunka hor joogsan doonaan.

Iyaga xitaa waxay u baahan yihiin saamaxaadda Masiixa, oo haddaysan helinna naxdin ka weyn ma jirto. Ilaah wuxuu doonayaa inuu dadka oo dhan badbaadiyo oo qaabilaan nabaadiinadiisa. Bal aynu dadka hor keenno Ilaah, oo Ilaah hortii uga ducayno. Aan Ilaah u weyddiinno inuu tuso nimcadiisa iyo naxariistiisa iyaga, si ay ku helaan saamaxaadda iyo naxariista Ilaah oo ay u badbaadaan.

SONG: AAN AMMAANNO RABBIGA

Waxaa haddaba intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli doontaan toddobaadka dambe (saacadahan oo kale isla idaacaddan) Waxaad waraaqaha noogu soo qortaan P.O. Box 21514, oo koodku yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad

noogu soo diri kartaan tel: 0707032060. Emailkayaga waa afarah@twr.co.ke. Waxaa kaloo aad isla barnaamijkan ka daalacan kartaa websitekayaga, waxaana weeye isna www.twr360.org. Farriinta waxaad ka soo hor-marinaysaa Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060.